

## Feyruska nooca cusub ee Karoonaha oo ku fidiya gobolka - Raac sharciga si taxadar ah

**Hadda waxaa gobolka Kalmar ku sii fidiya nooca feyruska Ingiriiska.**

**Si fudud ayuu u fidaa noocan xataa ilmaha si fudud ayay u qaadaan.**

Feyrusku waa isbedeli karaa. Isbadalkaas waxaa la yiraahdaa dagal rogasho (mutation). Cilmi baarayaasha waxay ogaadeen inuu dagal rogasho badan oo feyriska ah ka jiro adduunka. Mid kuwaas ka mid ah waa nooca Ingiriiska oo si fudud oo dhakhso ah u fida. Wuxuu xataa ku dhici karaa dadka yar yar. Laakiin kama khatar badna kuwa kale. Waxay u badantahay in dadka waaweyni ay qaadsiiyeen ilmahooda. Kaddibna ilmaha ay isa sii qaadsiiyeen.

Hadda dhakhtaradda cudurada faafa ee Lisa Labbé Sandelin waxay doonaysaa in ilmaha lagu arkay astaamooyinka cudurka la baaro. Waxaa carruurta loo baadhayaa sida dadka waaweyn oo kale. Ka dalbo baaritaanka beyjka 1177.se ama wac xarunta caafimaadkaada.

Waalidiinta iyo ilmahaba waa iney ku dadaalaan kala fogaanshaha oo ay guryaha ku ekaadaan, haddii astaamaha cudurka lagu arko. Haddii ilmo dhigta iskuulka uu ku dhaco cudurka waxaa suurta galka ah in la xidho iskuulka. Markaa ilmuhu waxa ay joogayaan guriga inta ay aqoonyahanada hay'adda cudurrada faafa iyo iskuulkuba ay ka baarayaan halka uu ka bilowday. Taas macnaheedu waxa weeyaan in aaney ka qaybgeli karin, hawlaha iskuulka ama aysan la kulmi karin carruurta kale. Sidoo kale lama kulmi karaan kuwa aan ka ahayn kuwa ay isku xayndaabka yihiin.

### **Ku dhex jir dadka aad aalaa la kulantid:**

Waxaa taas laga wadaa dadka aad maalin walba is aragtaan. Tusaale ahaan kuwa aad la deggantahay iyo laba saaxiib oo kale.

### **Sidan buu u socdaa tallaalka gobolka**

Talaalidda gobolku wey socotaa. Qofka ka weyn 65 baa hadda la talaalayaa. Marka waqtigaada lasoo gaaro waxaa kuu imanaysa warqad af Iswiidhisha ku qoran.

Warqadii hore ee **Maxaa ka cusub Karoonaha** ayey ku qornayd sidaad u sameysan lahayd waqti.

Hadda talaalkii daahid baa yara gashay. Intii talaal ee ay Iswiidhan dalbatay may wada helin. Waxaa kaloo la hubinayaa inuu nabadgelyo yahay. Sida ugu dhakhsaha badan marka helno talaalka lana hubsado inaanu dhibaato keeneyn, ayaa la dar dar gelinayaa.

Gobolku uma dirayo warqad dadka da'doodu u dhaxayso 18-64. Laakiin ol ole iyo xayeysiin warbixineed baad heli doontaan.

Warqaddan **Waxa ka cusub karoonahana** waan ku sheegi doonaa.

*Markaa lasocoo indhahana fur!*

### **Fasaxa Booskaha**

Mar dhow waxaa ardayda dugsiyadu geli doonaan fasaxii booskaha. Booskuhu inta badan wuxuu kusoo beegmaa xilliga gu'ga oo kuleylkiina bilowday.

Waa waqti ku fiican in ilmaha iyo dadka waaweynba ay in badan dibbadda guriga uga baxaan. Ka fikira kala fogaanshaha dadka kale. Dibaddana ha u bixin hadaad calaamadah cudurka leedahay. Sidoo kale waxa ay khusaysaa carruurta!

Dad badan baa fasax ka qaata shaqadooda oo safara aada. Sanadkaan gobolku wuxuu doonayaa inaad guryaha joogtaan. Haddiise aad dhooftaan waa in aad aad u taxadartaan, si aydaan cudurka u qaadin idinkana leydiin qaadsiinin.

**Ciid wanagsan intiina ciideysa Booskaha!**